IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad Muqdisho 1 Diseember 1979 L. 12

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

*QIIMUHU : waa 5 shilin lambar waliba RUKUNKA : Sanad-kii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibadana waa Sh so. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta wxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta*

## *KOOBNIIN*

*QAYBTA KOOWAAD*

**SHARCI**

**W. M.**

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 62 ee 1 Sebt. 1979, Wareejinta Beerta Mooska Golweynii

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 63 ee 4 Nooфeember 1979, Guddiga Qaranka ee Doorashada Golaha Shacbiga

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 64 ee 19 Nofeember 1979, Magacaabid Xubin Guddi Cadaalad.

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 65 ee 25 Nofeember 1979, Guddiga Qaranka ee Xulka Xubnaha Golaha Shacbiga iyo kuwa Degaanka.

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 66 ee 10 Diseember Magacaabid Maareeyaha Guud Hay'adda Daryeelka Qaxootiga.

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 67 ee 1 Diseember 1979, Xadidaadda maalinta doorashada shada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee deegaannada.

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 68 ee 16 Nofeember 1979, Magacaabid Agaasimeyaal Guud

MAXKAMADDA G. SH/HOOSE LUMID BUUG KAYD L. 592

MAXKAMADDA G. BANNADIR LUMID BUUG KAYD L. 8652

MAXKAMADDA GOBOLKA BAYDHABO, Lumid Jeeg War. L. 17496 uu leeyahay Maxamed Faarax Maxamed L. 591

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE Lumid Buug Kayd L. 1308 ay leedahay Faaduma Yuusuf Guuleed L. 592

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR Lumid mid Buug Kayd L. 6614 ay leedahay Aamina Guuleed Jaamac L. 593

## SAXID QALAD

FAAFINT ARASMIGA AH ee lamb. yahay 1 R 5 ee soo baxday 25 Maajo 1979, bog. 377 oo uu ku soo baxay Xeerka lamb. yahay 22 Qod. keliya qaybta koowaad waa in loo akhriyaa sida hoos ku qoran.

**Garsoore Xasan Yuusuf Nuur**

## QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 62 ee 1 Seteember 1979 Wareejinta Beerta Mooska Golweyn.

**MADAXWEYNAHA**
**J. D. S.**

MARKUU ARKAY: Heshiisku dhex maray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Liibiye, 17kii Bishii Jennaayo 1972;

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo horumarinta Beeraha;

ISAGOO TIXGELINAAYA go'aankii ka soo baxay Golaha Wasiiradda;

**WUXUU XEERAY**

**QODOBKA *1*AAD**

Hantida Beerta Mooska ee Golweyn ee W. M. U. marka laga bilaabo 1da Sibtembar 1979, lagu wareejiyey Shirkadda Horumarinta Beeraha ee Soomaaliya iyo Liibiya (LIBSOMA).

**QODOBKA *2*AAD**

Hantida Beerta waxa loo tixgelinaya gundhiga u noqonaya Saamiga Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ay ku darsatay Shirkadda Qodobka 1aad lagu xusay.

**QODOBKA *3*AAD**

Waxa la baaba'shay Sharci kasta oo kan ka soo horjeeda ama aan la socon karin.

**QODOBKA *4*AAD**

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Sibtembar 1979, waxaana lagu soo dhigayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 1. 9. 1979

*Jaalle* **S/GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE**
**MADAXWEYNAHA J.D. S.**

Waan Aragnay ee Diinwaangelinnay
Diiwaanka Lamb. 1 Bogga lamb. 118,
Muqdisho 21 Nof. 1979

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 63 ee 4 Nofeember 1979
Guddiga Qaranka ee Doorashada Golaha Shacbiga

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

MARKUU ARKAY : Qodobka 82aad ee Dastuurka Jamhuuri-da Dimuqraadiga Soomaaliya;

MARKUU ARKAY : Qodobka 61aad ee Dastuurka Jamhuuri-yada Dimuqraadiga Soomaaliya oo la xiriira doorashada Xildhibaanada Golaha Shacbiga;

ISAGOO TIXGELIYAY : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo kii Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaali-yeed, taariikhdiisuna ahayd 25 Oktoobar 1979

WUXUU XEERAYAA
QODOBKA 1AAD

Jaallayaasha magacyadooda hoos ku qoranyihiin waxaa loo magacaabay Guddiga Qaranka ee Doorashada Golaha Shacbiga :

1) Jaalle S/Gaas Xuseen Kulmiye Afrax — Guddoomiye
2) Jaalle S/Guuto Axmed Suleymaan Cabdalla — Guddoomiye Ku-Xigeen
3) Jaalle G/Sare Cabdulqaadir Xaaji Maxamed — Xubin
4) Jaalle S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalib — Xubin
5) Jaalle Dr. Axmed Ashkir Bootaan — Xubin
6) Jaalle Aaden Maxamed Cali — Xubin
7) Jaalle Dr. Cabdisalaam Sheekh Xuseen — Xubin
8) Jaalle Dr. Keenadiid Axmed Yuusuf — Xubin
9) Jaalle S/Gaas Aden Cabdi Ducaale — Xubin
10) Jaalle S/Guuto Yuusuf Axmed Salxaan — Xubin
11) Jaalle Axmed Jaamac Cabdulle — Xubin Xoghaye

QODOBKA 2AAD

Xilka iyo awooda Guddiga Qaranka ee Doorashada Golaha Shacbiga waxay tahay : in ay abaabulaan, maamulaanna guud ahaan hawlaha la xiriira doorashada Golaha Shacbiga oo ku tilmaaman qod. 61aad iyo qodobadda kale ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed.

## QODOBKA 3AAD

1) Guddiga Qaranka ee Doorashada Golaha Shacbiga wuxuu leeyahay Xoghayn Dhexe oo Guddigaas hoos yimaada, fuliyana go'aannadooda; waxaana xoghaynta dhexe madax u ah Jaalle Axmed Jaamac Cabdulle oo xubin ka ah Guddiga.

2) Xoghaynta Dhexe waxay yeelanaysaa cudud ay ku shaqeyso, xilkeeduna wuxuu yahay:

a) Qabanqaabinta hawlaha la xiriira Guddiga;
b) Iskudubaridka shaqada iyo go'aannada Guddiga
t) Qoridda go'aannada, keydintooda, fulintooda iyo ku dhaqaaqidda amarrada ka soo baxa Guddiga Qaranka ee Doorashada Golaha Shacbiga.

3) Xubnaha la shaqeyn doono Xoghaynta Dhexe ee Guddoomiyaha Guddiga Qaranka ee Doorashada Golaha Shacbiga.

## QODOBKA 4AAD

1) Xoghayaha Guddiga wuxuu masuul ka yahay:
a) Maamulka Guud ee Shaqada Xoghaynta
b) Habsami u socodka hawlaha la xiriira Xoghaynta iyo fulinta go'aannada Guddiga.

2) Xoghayaha Guddiga iyo Agaasimaha Guud ee Lacagta Madaxtooyada ayaa wadajir ahaan awood loo siiyay in ay maamulaan kharajka la xiriira hawlaha Guddiga, iyagoo raacaaya amarrada ka soo baxa had iyo jeer Guddiga Qaranka ee Doorashada Golaha Shacbiga.

## QODOBKA 5AAD

1) Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta uu saxiixo Jaalle Madaxweynaha J. D. S.

2) Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho 4 Nofeember 1979

**M A D A X W E Y N A H A**

*Jaalle* **Moxamed Siyaad Barre**

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 64 ee 19 Nofeember 1979
Magacaabid xubin Guddi Cadaalad
tuurka J. D. S.

**MADAXWEYNAHA**
**J. D. S.**

ISAGOO ARKAY : Qodobada 82, 93, 94, 111, 113aad ee Das-

ISAGOO ARKAY : Sharciyada Lamb. 38 ee 5 Abriil 1972 iyo beddelaadii ka dambbeysay.

ISAGOO ARKAY : Sharciyada Lamb. 17, 18, iyo 19 ee 1da Luuliyo 1976.

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lamb. 5 ee 16. 8. 1979 oo lagu dhisay Guddiga Caddaaladda.

ISAGOO TIXGELIYAY : Taladii uu soo jeediyey Guddoomi-

**Guddiga Cadaaladda**

**W U X U U  X E E R A Y A A**

**QODOBKA *1*AAD**

In Dr. Faaduma Cabdullaahi Xaaji loo magacaabay Garsoore Xubin ka ah Guddiga Cadaaladda ee Madaxtooyada J.D.S

**QODOBKA *2*AAD**

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

*Muqdisho 19 Nofeember 1979*

**S/GAAS MADAXWEYNAHA SIYAAD BARRE**
**MADAXWEYNAHA J. D. S**

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 65 ee 25 Noofember 1979, Guddiga Qaranka ee Xulka Xubnaha Golaha Shacbiga Qaraanka ee Xulka Xubnaha Golaha Shacbiga iyo kuwa Degaanka.

## MADAXWEYNAHA
## J. D. S.

MARKUU ARKAY : Qodobka 82aad xubintiisa 14aad ee Dastuurka J. D. S.

MARKUU ARKAY : Qodobadda 61aad iyo 95aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo la xiriira doorashada Xildhibaanada Golaha Shacbiga iyo xubnaha Golaha Shacbiga ee Deegaanka;

ISAGOO TIXGELIYAY : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo kaa Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed

## WUXUU XEERAYAA
### QOODOBKA 1AAD

Jaallayaasha magacyadooda hoos ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay Guddiga Qaranka Xulka Xubnaha Golaha iyo kuwo Degaanka :

| | | |
|---|---|---|
| 1) | Jaalle S/Guud Maxamed Cali Samantar | Guddoomiye |
| 2) | Jaalle S/Guuto Ismaaciil Cali Abokor | Xubin |
| 3) | Jaalle G/Sare Cabdulqaadir Xaaji Maxamed | Xubin |
| 4) | Jaalle G/Sare Axmed Maxamuud Faarax | Xubin |
| 5) | Jaalle Dott. Maxamed Aaden Sheekh | Xubin |
| 6) | Jaalle Dott. Ibraahim Meegaag Samatar | Xubin |
| 7) | Jaalle Dott. Maxamuud Cali Axmed | Xubin |
| 8) | Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame | Xubin |
| 9) | Jaalle Faaduma Cumar Xaashi | Xubin |
| 10) | Jaalle Dott. Warsame Cabdullaahi Cali | Xubin |

### QODOBKA 2AAD

Xilka Guddiga lagu soo tilmaamay qod. 1aad ee Xeerkaan waxay tahay in ay qorsheeyaan, habeeyaanna habka xulidda xildhibaannada Golaha Shacbiga iyo Xubnaha Golaha Shacbiga ee Degaanka iyagoo raacaaya mabaadiida Guud ee ku qeexan Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya, Barnaamijka iyo Xeerka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta u saxiixo Jaalle Madaxweynaha

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 25 Nofeeber 1979

MADAXWEYNAHA J. D. S.

**XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 66 ee 10 Diseember 1979**
**Magacaabid Maareeyaha Guud Hay'adda Daryeelka Qaxootiga**

**MADAXWEYNAHA**
**J. D. S.**

ISAGOO ARKAY : Qodobka 82aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda D. Soomaaliya;

ISAGOO AQOONSADAY : Inay lagama maarmaan tahay in la magacaabo N. Guud ee Hay'adda Daryeelka Qaxootiga, kaddib markii laga dhigay Hay'ad Madax bannaan.

**WUXUU GUDDOOMIYEY**
**QODOBKA 1AAD**

Jaalle Saciid Maxamed Gees, waxaa lagu Magacaabay Maareeyaha Guud ee Hay'adda Daryeelka Qaxootiga laga bilaabo 1. 11. 1979.

**QODOBKA 2AAD**

Dekereetadani Degdeg ayey u hirgaleysaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 1 Diseember 1979

**S/GAAS MAXAMED SIYADD BARRE**
**MADAXWEYNAHA J. D. S.**

Waan Aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 6 Bog. lamb. 159
Muqdisho 1 Diseember 1979,
Hantidhawraha Guud KMG,
— **Yuusuf Cali Nuur** —

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 67 ee 1 Diseember 1979, Xadidaadda maalinta doorashada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee deegaannada.

MARKUU ARKAY : Qod 111, 82 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Qod 6aad ee Sharciga Doorashada Golaha Shacbiga iyo golayaasha Shacbiga ee deegaannada

MARKUU ARKAY : In ay lagama maarmaan tahay in la xaddido Taariikhda qabashada doorashada;

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada Guddiga Qaranka ee doorashada;

**WUXUU SOO SAARAY**

**Xeerka soo socda :**

**Qodd. 1aad**

Doorashada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee deegaannada waxaa la qabanayaa 30ka Disember 1979.

**Qod. 2aad**

Hawlaha doorashada waxay soconayaan 7da aroornimo ilaa 6da fiidnimo ee maalinta ku tilmaaman Qodobka 1aad. Hase yeeshee codbixintu waa soconeysaa ilaa inta laga dhammeynayo doortayaasha goobta hortaagan.

**Qod. 3aad**

Xeerkanwaxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JDS, wuxuuna dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho 1. 12. 1979

**MADAXWEYNAHA**
**Jaalle Maxamed Siyaad Barre**

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 68 ee 16 Nofeember 1979, Magacaabid Agaasimeyaal Guud

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya iyo Sharciga Dhismaha Bankiga Qaranka Soomaaliyeed Lr. 27 ee 26kii Nofeember 1968;

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lr. 21 ee 1dii Maarso 1975 oo magaca Bankiga Qaranka Soomaaliyeed loogu beddelay Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed;

ISAGOO XAQIIQSADAY : Xilka iyo hawlaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya inay aad u ballaarteen sidaas awgeed loo baahanyahay in loo abuuro labo Agaasin Guud;

ISAGOO FULINAYA : Go'aanka Golaha Dhexe ee X. H. K. S.

**WUXUU GUDDOOMIYEY**

**Qodobka 1aad**

In laga bilaabo 9ka Oktoobar 1979 loo abuuro Bankiga Dhexe ee Soomaaliya (2) labo Agaasin Guud.

**Qodobka. 2aad**

Labada Agaasin Guud ee qodobka 1aad ku xusan waxaa loo magacaabay Jaalleyaasha kala ah MAXAMED MAXAMUUD NUUR (Shot) iyo SACIID MAXAMED CALI (Sheff).

**Qodobka 3aad**

Markuu Guddoomiyuhu ka maqan yahay Xarunta, waxaa mas'uul ka ahaanaya maamulka caadiga ah ee Bankiga labada Agaasime Guud kii ugu waayeelsan dhanka derejada.

**Qodobka 4aad**

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa durbadiiba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

**Muqdisho 16 Nofeember 1979**
**Jaalle Maxamed Siyaad Barre**

## QAYBTA SADDEXAAD

## MAXKAMADDA GOBOLKA BAY BAYDHABO

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Bay
Haddii uu arkay Dacwadda kor ku qoran iyo waxaa ay ku saabsan tahay :-

HADUU ARKAY : Ogeysiiska Bangiga

HADUU ARKAY : Qodobada 69 D. L. 65 N2 dhumidda

Jeegga Wareega Lamb. 17496 Taariikh 20. 7. 1978 kuna qoran tahay Lacag dhan 564 Sh .So.

### WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeeggaas wareega kadib markii ay ka soo wareegtay 15 Maalmood Maalinta Dikereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

### WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga Cusub ee la sameen doono Gacanta laga saaro Maxamad Faarax Maxamad ee jeegga ka dhumay ama qof asaga ka Wakiil ah ayagoo la sugayo Faafinta ka dib 15 Maalmood
Baydhabo, 17.1. 1979

**GUDOOMIYAHA MAX. G. BAY**
**Dr. Xuseen Faarax Hilowle**

L. 591

MAXKAMADA GOBOLKA SHABEEL/HOOSE MARKA

HADDUU ARKAY: Waxa aay ku saabsan tahay; arkay Ogeysiiskii Bangiga eeg Warqadda bangiga lamb. 000587 ee bangiga keydka iyo ganacsiga, Laanta Afgooye;

WUXUU OGAADAY INEEY TAHAY SHAQADIISA

HADDUU ARKAY : Qod/ka D. L. 9. 9. ee 1965 N. 2

WUXUU CADDEYNAYAA

In buugga Keydka ee Lamb 1308 oo aay ku qorantahay Shs. So. 4.424 (afar kun afar boqol labaatan iyo afar), iskana leedahay Faaduma Yuusuf Guuleed;

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo buugga Keydka ee cusub qofka kor ku magacaaban 15 (shan iyo toban maalmood ka dib markii amarkaan lagu shaaciyo Faafinta rasmiga ah ee ee dawladda :

WUXUU CODSANAYAA

In buugga keydka oo loo sameyn doono gacanta laga saaro; Faaduma Yuusuf Guuleed, ama qof iyada ka **sita Wakaalad** sharci ah, iyadoo la sigaayo 15 Maalmood :

KAALIYAHA MAXKAMADDA
Cali Siyaad Rooble

GARSOORAHA MAX. GOB. SH. HOOSE
Dr. Axmed Sheekh Cali Nuur

Marka 12. 11. 1979

L. 592

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU AKHRIYEY : dacwadda kor ku qoran;
HADDUU HUBSADAY : in Buuga Keydka dhumay lambarkii-su ahaa 6614 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta 1aad kuna qornayd lacag dhan Shs. So. 2.636/= iska lahaa Aamina Guuleed Jaamac scida ku cad warqadda lamb. 8652 taariikh 26. 11.79 oo bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta 5aad.

HADDI UU ARKAY :qod 69 Sharciga lamb. 2 ee 9. 9. 1965

**WUXUU XEERIYEY**

In la baabiyo Buuga Keydka lamb. 6614 oo ku qoran magaca Aamina Guuleed Jaamac ayna ku jirto Sh So. 2.636/=

**WUXUU FASAXAY**

In bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u beddelo Aamina Guuleed Jaamac buugga keydka), ee ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 26. 11. 1979.

*Gudoomiyaha Maxkamadda Gobol. Benaadir*
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 593

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**
**GUDDOOMIYE**

HADDUU AKHRIYEY: dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In buug kayd ka dhumay oo lambarkiisu ahaa 16160, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 14.500/=xx uu iska lahaa Xasan Cabdullaahi Aadan sida ku cad warqadda lam. 02821; taariikh 18/10/79 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 5aad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam, 2 ee 9/9/65.

**WUXUU XEERAYAA**

In la baabi'iyo (ammortamento) (buugga dhigashada), lam. 16160, oo ku qoran magaca Xasan Cabdullaahi Aadan ayna ku jirto Sh. So. 14.500/=

**WUXUU FASAXAY**

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta u beddelo Xasan Cabdullaahi Aadan buugga keydka, ee ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30, maalmood, maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 18/10/79

*Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir*
Jaalle Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax-

L. 594